USIS
Ururka Shirkaddaha Isgaarsiint Somaliyeed

# WAR-SAXAAFADEED

**Muqdisho, February 5th, 2019**

Bishan Feberaayo 2-dii 2019 waxaa saxaafada la hadlay Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolajiyada Eng Cabdi Cashuur Xasan isagoo ka hadlay arrimo la xiriira Isgaarsiinta dalka gaar ahaan Shirkadaha bixiya adeegyada Isgaarsiinta, kuna sheegay in shirkaduhu yihiin sharci darro haddii aysan is-diiwaan gelin bishan Febaraayo gudaheeda, isla markaana ku goodiyay in tallaabo sharci ah laga qaadi doono Shirkadaha Isgaarsiinta.

Haddaba Ururka USIS oo ah Urur ay ku mideysan yihiin Shirkadaha bixiya adeegyada telefoonada iyo Internet-ka ee hoos ku xusan oo ka jawaabaya qodobadaas wuxuu War-saxafadeedkan ku caddeynayaa:

1. In dhamaan Xubnaha Ururka ay leeyihiin sifo jiritaan sharci iyo in ay yihiin Shirkadii Isgaarsiinta oo dalka ka soo shaqeynayay mudda aad u dheer, ay leeyhiin ruqsado adeeg bixin, ayna diyaar u yihiin nidaaminta iyo waafajinta sharciga dhamaan adeegyada ay bixiyaan si waafaqsan Sharciga Isgaarsiinta.

2. Waxaa wax laga xumaado ah in Wasiirku ku adkaysanayo diidmada sixitaanka khaladaadka go`aanadii uu qaatay, isagoo islamarkaa si bareer ah ugu qirtay warbaahinta gudaha iyo dibadda, in ay jiraan arrimo dhowr ah oo ku baalmarayo Sharciga Isgaarsiinta sida:
    - In ay jiraan Shirkado gaar loo leeyahay -sida uu Wasiirku sheegay- oo uu isagu u soo magacaabay xubno ku matala Guddiga Maamulka Hay`adda Isgaarsiinta taasi oo ah arinta muranka badan dhaliyay!!
    - In Madaxweynaha JFS saxiixay sharci kala dhiman oo aan aheyn kii golayaasha Baarlamaanka soo ansixiyeen, taas oo shaki weyn galisay xalaal noqoshada Sharciga Isgaarsiinta Qaranka.
3. Ururku wuxuu ka digayaa mar kale cawaaqib xumada ka dhalan doonta go`aanada la rabo in loogu daneeyo Shirkaddo gaar ah, halka kuwo kalana la rabo in suuqa looga saaro iyadoo la rabo in la meel mariyo cabirro khaldan ee qiimeynta iyo habraaca bixinta ruqsadaha iyo xuquuqa kale ee dalka.

4. In aysan jirin cid hanjabaad iyo awood ku meel marin karta go`aano aan sharci aheyn, kana hor imaanaysa Sharuucda dalka iyo xeerarkii loo dajiyay maareynta iyo maamulka Isgaarsiinta dalka.

5. Ururku wuxuu baaq u dirayaa Xukuumadda Somaaliyeed iyo inta u taagan danaha dalka iyo dadka in laga hortago marin habaabinta hadafkii Sharciga.

**--DHAMAAD—**

NATIONLINK telecom, somafone, Dalkom, SAHAL TELECOM, Amtel, Somalia Wireless, SOON Somali Optical Networks, somcast, AirSom Technologies